



OFFICE OF ARTS & CULTURE
CITY OF SEATTLE

Tilmaamaha Codsiga Dhacdooyinka iyo Bandhigyada, ARTS ee Saldhigga King Street

Dulmarka Arjiga

Saldhigga King Street ee ARTS waa meel firfircoon oo fanka iyo dhaqanka oo ku taal bartamaha Seattle. Waxaan kugu marti-galinaynaa inaad soo gudbiso (soo jeediso) bandhigyo iyo dhacdooyin lagu qabanayo dabaqa sare ee Saldhigga King Street, oo ah 7,500 taako labajibbaaran (feet) oo dhaqameed, inta lagu jiro xilliga sanadka 2025. Waxaad soo jeedin kartaa bandhig faneed muuqaal ah, bandhigyo, wax akhrin, muxaadaroooyin, baaritaanno, kooxo wax-akhris, doodo, sawir-gacmeed iyo qof sawirid, isku-dar qaababkan, iyo in ka badan.

Wixii macluumaad ah iyo taageerida codsiga, u-qalmitaanka, ama taageerada farsamada ee khadka, la xirii **James Coley**, Horjoogaha Barnaamijka Saldhigga King Street, adoo ka wacaya **(206) 684-4186** am james.Coley@seattle.gov. **Waxaan haysanaa turjubaano ku gula hadli kara luqadaada, ku waa soo ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika (muuqaal ahaan).** Haatan nasoo wac oo noo sheeg luqadaad ku hadasho. Filo hakad gaaban inta aan heleyno turjumaan si uu ugu biiro wicitaanka.

Codsiga

[Ka dalbo onlayn iyada oo loo marayo Submittable](#). Waa bilaash in la codsado. Hadii aadan haysan kumbuyuutar ama aadan heli karin khad, la xirii **James Coley** adoo ka wacaya **(206) 684-4186** ama James.Coley@seattle.gov sida ugu dhaqsaha ee macquulkaa.

Taariikhda ugu danbeysa oo la codsan karo

Wicitaanku wuxuu furan yahay ilaa 2024 oo leh wakhti kama dambays ah Wareegyada dib u eegista 2024 waxay leeyihiin taariikho kama-dambays ah: **Juun 25, Sebteembar 10, iyo Nofeembar 9**. Codsiyada la soo gudbiyay ka dib 5 galabnimo (Pacific) taariikhda kama dambaysta ah kasta waxaa loo qaddarin doonaa wareegga soo socda.

U-qalmitaanka

Waxaad codsan kartaa si shakhsi ahaan ah ama koox dad ah hadii:

- Aad jirtid 15 ama ka weyn tahay.
- Waxaad matashaa farshaxaniin (fanaaniinta) soo koraysa iyo/ama fannaaniinta la aasaasay.

Kooxo ama hay'ado sidoo kale waa ay codsan karaan:

- Waxay ahaan karaan kuwo aan faaiido doon ahayn, kooxo bulsho, ama hay'ado ganacsi.

- Waxay taageero u raadiyaan mashruuc ama kulan ku lug leh fanka iyo dhaqanka.
- Loogama baahna inay u heella-naadaan hawsha fanka iyo dhaqanka.
- Loogama baahna inay leeyihiin 501(c)(3) xaalad aan macaash doon ahayn.

Arjigaagu waa inuu:

- Ka dhacaa goobta ARTS ee King Street Station, 303 S. Jackson Street. Inta badan barnaamijyada la xushay waxay ka dhici doonaan dabaqa sare.
- La jaanqaad [ballankayaga xagga jinsiyadda iyo caddaaladda bulshada](#).
- Leeyahay qayb faneed iyo dhaqan muhiim ah.
- Noqo xor, da' kasta, oo u ogolow dadweynaha.
- Ka dhacaa inta lagu jiro saacadaha bandhigga dadweynaha: Arbaco-Sabti 11:00 subaxnimo-5:00 galabnimo; Khamiista ugu horeysa 11:00 subaxnimo - 8:0 p.m. **Axadaha iyo Isniinta lama heli karo munaasabadaha.**

Mashruucaagu waa inuusan:

- Si toos ah u iibin alaabta ama ku dhajin qiimaha, in kastoo aad dhigi karto aqoonsi iyo xogta xiriirka si iibsadayaashu (macaamiishu) ay diyaariyaan iibka ARTS ka baxsan King Street Station.
- Isticmaalin iibinta tigrada. Dhamaan mashruucyadu waa inay dadweynaha loo soo bandhigaa si lacag la'aan.
- Noqo mid macaash (faa'iido) doon ah ama dhacdo dalxiis ganacsi ah.

Maalgelinta

Soo jeedinta la maalgeliyay waxay heli doontaa qaab nooc ah (isticmaalka bandhigga leh taageero ilaalineed iyo isgaarsiinta) ama taageero maaliyadeed ee qaddarka go'an ee soo socda:

- Bandhigyada/Rakibaadaha keliya wixii lacag ahayn, \$500, \$1,000, \$2,500, \$5,000, \$7,000
- Dhacdooyinka: keliya wixii lacag ahayn, \$500, \$1,000, \$2,500, \$5,000
- Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo heer deeq-lacageedka ka duwan codsigaaga.

Waxaad u isticmaali kartaa maalgelinta si'aad u taageerto kharashyada mashruuca tooska ah. Maalgelinta looma isticmaali karo iibsashada qalabka.

Aqoon isweydaarsiyada macluumaadka

Wax badan ka baro deeqdan iyo sida loo gudbiyo arjigaaga ugu wanaagsan. Haddii aad u baahan tahay fasiraad, fadlan kala xidhiidh **James Coley (206) 684-4186** ama James.Coley@seattle.gov.

Aqoon-is-weydaarsi khadka maqal iyo muuqaalka 1

Arbaca, Juun 5, 3-4:30 p.m (Pacific)

[Iska-diiwaan gali Bandhiga 1](#)

Aqoon-is-weydaarsi khadka maqal iyo muuqaalka 2

Arbaca, Agoosto 14, 5-6:30 p.m.

[Iska-diiwaan gali Bandhiga 2](#)

Aqoon-is-weydaarsi khadka maqal iyo muuqaalka 3

Arbaca, Aktoobar 23, 5-6:30 p.m.

[Iska-diiwaan gali Bandhiga 3](#)